## ماذا بعد الحج؟

## Maxaa ka dambeeya Xajlka?

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(إِنَّ الَّذِينَ قَالُوا رَبُّنَا اللَّهُ ثُمَّ اسْتَقَامُوا تَتَنَزَّلُ عَلَيْهِمُ الْمَلَائِكَةُ أَلَّا تَخَافُوا وَلَا تَحْزَنُوا وَأَبْشِرُوا بِالْجَنَّةِ الَّتِي كُنْتُمْ تُوعَدُونَ)

**(Kuwa yiri rabbigeena waa Alle hadana toosnaaday waxaa ku soo dagta malaa'igta (markey dhiman iyadoo ku dhihi) ha cabsanina hana murugoonina, kuna bishaareysta jannadii laydiin yaboohay)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Qofka fiirfiirinaya sunnooyinka Alle –*cazza wajalla*- ee kowniga ah ee khalqigiisa wuxuu arkayaa degdegga ay ku dhamaanayaan maalmaha iyo bilaha iyo sannadaha, nolosha adduunka waa neef tirsan, iyo ajal xaddidan,

taasna waxaa ugu sugan cibro qofkii fikiraya oo wax fiirfiirinaya, Alle wuxuu leeyahay – *subxaanahu* –:

(وَهُـوَ الَّـذِي جَعَـلَ اللَّيْـلَ وَالنَّهَـارَ خِلْفَـةً لِمَـنْ أَرَادَ أَنْ يَـذَّكَّرَ أَوْ أَرَادَ شُكُورًا)

(**Waa Allaha uga yeelay habeenka iyo maalinta Isbaddel qofkii doona inuu wax xusuusto ama doono inuu mahdiyo**), Haddii xajka mabruurka (kan si fiican loo gutay) Alle dambiyada ku dhaafayo oo xaajiga uu noqonayo isagoo maalinta hooyadiisa dhashay oo kale, wuxuu leeyahay nabiga:

(مَنْ حَجَّ ، فَلَمْ يَرْفُثْ، وَلَمْ يَفْسُقْ، رَجَعَ كَيَوْمِ وَلَدَتْهُ أُمُّهُ).

(**Qofka xajiyo oo aan afxumo ku kicin fisqina sameynin wuxuu ku noqonayaa sida maalinta hooyadii ku dhashay oo kale**)

Qofka caqliga leh waxaa laga rabaa inuu ka faa'idaysto fadliga Ilaahay siiyay oo uu ka tago dhammaan dambiyada, oo Ilaahay uu la aado qalbi saafi ah iyo ikhlaas ballaaran.

qofka xaajiga waxaa ku habboon inuu dareemo nimcada Ilaahay uu siiyay, illeen wuxuu waafajiyay gudashada cibaadadan, iyo inuu ogaado taas inay u baahan tahay Ilaahay - *subaxaanahu watacaalaa* – in loogu mahdiyo daa'imidda camalka suuban, daacooyinka ma laha meel gaar ah iyo saman u gaar ah, balse waa joogto intuu aadanaha nool yahay,

shuruudaha takliifkana ay jiraan, sidaan ayuu sameyn jiray nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -, in la daa'imo daacooyinka iyo cibaadiiyinka waa u hoggaansamid loo hoggaansamayo oraahda Alle:

(وَاعْبُدْ رَبَّكَ حَتَّى يَأْتِيَكَ الْيَقِينُ)

(**Caabudna rabbigaaga intay yaqiintu kaaga timaaddo**)

iyo hadalka Alle:

(فَإِذَا فَرَغْتَ فَانْصَبْ* وَإِلَى رَبِّكَ فَارْغَبْ)

(**Ee markaad salaadda dhammayso isku dhib (Samo fal) * Allana (Khayr) ka rajee**), taasoo laga wado haddii aad daaco kasoo baxdo daaco kale gal adoo Ilaahay – *cazza wajalla* - wejigiisa ula jeedo.

In la daa'imo camalka suuban waxay ka mid tahay camalka Alle xaggiisa loogu jecel yahay, waxayna astaan u tahay khaatumada suuban, Caa'isho – Ilaahay raalli haka noqdee - waxaa laga wariyay inay tiri: nabiga ayaa la weydiiyay camalkee loogu jecel yahay Alle agtiisa? wuxuu yiri:

(أَدْوَمُهَا، وَإِنْ قَلَّ)

(**Kan joogtada ah xitaa hadduu yar yahay**)

Tahniyad ayaa ugu sugan qofka Ilaahay waafajiyay daacadiisa camalkiisana hagaajiyay dabcigiisana mid

fiican ka dhigay dadka arrimahoodana u fuliyay kurbadoodana ka qaaday kuna faafiyay bulshadiisa iyo dalkiisa khayrka, Haddii mu'minka Ilaahay waafajiyay gudashada waajibka xajka, taas ma aha daacooyinka dhamaadkooda, bal waxaa laga rabaa wax badan oo ka mid ah camlka suuban oo Ilaahay uu ugu dhowaanayo, sida inuu badsado oo kale cibaadooyinka iyo sunnooyinka, salaad iyo soon iyo waxtarka dadka iyo kafaalaqaadidda agoonta booqashada dadka bukan, iyo waxyaalaha kale kor u qaadaya qiimihiisa xagga Alle, Abuu Hurayra waxaa laga wariyay inuu yiri rasuulka: Ilaahay wuxuu yiri:

**(... وَمَا تَقَرَّبَ إِلَيَّ عَبْدِي بِشَيْءٍ أَحَبَّ إِلَيَّ مِمَّا افْتَرَضْتُ عَلَيْهِ ، وَمَا يَزَالُ عَبْدِي يَتَقَرَّبُ إِلَيَّ بِالنَّوَافِلِ حَتَّى أُحِبَّهُ ، فَإِذَا أَحْبَبْتُهُ كُنْتُ سَمْعَهُ الَّذِي يَسْمَعُ بِهِ ، وَبَصَرَهُ الَّذِي يُبْصِرُ بِهِ ، وَيَدَهُ الَّتِي يَبْطِشُ بِهَا ، وَرِجْلَهُ الَّتِي يَمْشِي بِهَا ، وَإِنْ سَأَلَنِي لَأُعْطِيَنَّهُ ، وَلَئِنِ اسْتَعَاذَنِي لَأُعِيذَنَّهُ)**

**(... iiguma soo dhowaado addoonkayga wax looga jecayl badan yahay waxa aan ku waajibiyay, kama suulo addoonkayga inuu iigu soo dowaado sunnooyinka ilaa aan ka jeclaado, markaan jeclaadana waxaan noqonayaa maqalka uu wax ku maqlo, aragga uu wax ku arko, iyo gacantiisa uu fidinayo iyo lugtiisa uu ku soconayo, hadduu wax i weyddiiyo waan**

**siinayaa, hadduu magangalyo i warsadana waan magangalinayaa**).

sidoo kale waxaa ku habboon xaajiga inuu ka muuqdo raadka xajkiisa wanaagga dabcigiisa iyo dabacsanaanta la dhaqankiisa, arrinkan wuxuu ka mid yahay astaamaha tusinaya in xajka laga aqbalay, dadka wuxuu kula dhaqmaa dabci wanaagsan, si fiican wuu ula macaamaloonayaa, wixii ka gaabis ahaa xajka kahorna wuu haleelayaa, arrikaas dhaqankiisa ayuu ka muuqanayaa markuu la dhaqmayo ehelkiisa, sida aabbaha iyo hooyada iyo ilmaha, iyo qaraabo xiriirinta, iyo noocyada kale ee samafalka uu u fidiyo dadkoo dhan Alle wuxuu yiri:

**{لَيْسَ الْبِرَّ أَنْ تُوَلُّوا وُجُوهَكُمْ قِبَلَ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالنَّبِيِّينَ وَآتَى الْمَالَ عَلَى حُبِّهِ ذَوِي الْقُرْبَى وَالْيَتَامَى وَالْمَسَاكِينَ وَابْنَ السَّبِيلِ وَالسَّائِلِينَ وَفِي الرِّقَابِ وَأَقَامَ الصَّلَاةَ وَآتَى الزَّكَاةَ وَالْمُوفُونَ بِعَهْدِهِمْ إِذَا عَاهَدُوا وَالصَّابِرِينَ فِي الْبَأْسَاءِ وَالضَّرَّاءِ وَحِينَ الْبَأْسِ أُولَئِكَ الَّذِينَ صَدَقُوا وَأُولَئِكَ هُمُ الْمُتَّقُونَ }.**

(**Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorrax ka soo bax iyo qorrax u dhac, laakin samafale waa ruuxii rummeeya Alle, iyo Qiyaame iyo malaa'igta iyo**

**kitaabka (kutubta Alle), iyo nabiyada, oo siiya xoolaha isagoo jecel qaraabada, iyo agoonta, iyo masaakiinta, iyo musaafirka, iyo kuwa tuugsada qoor xureyn, oogana salaadda, bixiyana zakada, oofiyana ballanqaadkooda, markay ballamaan, oo ku adkeysta dhibka iyo rafaadka iyo waqtiga dagaalka, kuwaasina waa kuwa ka runsheegay Iimaankooda waana kuwa dhawrsada**).

Xajka waxaa lagama maarmaan ah inuu ku reebo saameyn xagga akhlaaqda dhaqanka xaajiga, xajka ma aha cibaado eber ah oo hadaf ama ujeeddo la'aan la guto, balse waa cibaado loo jideeyay si aadanaha ay qiimo ugu yeesho oo akhlaaqdiisa ay kor u qaaddo wuxuu yiri Alle:

**{الْحَجُّ أَشْهُرٌ معْلُومَاتٌ فَمَنْ فَرَضَ فِيهِنَّ الْحَجَّ فَلَا رَفَثَ وَلَا فُسُوقَ وَلَا جِدَالَ فِي الْحَجِّ وَمَا تَفْعَلُوا مِنْ خَيْرٍ يَعْلَمْهُ اللَّهُ وَتَزَوَّدُوا فَإِنَّ خَيْرَ الزَّادِ التَّقْوَى وَاتَّقُونِ يَاأُولِي الْأَلْبَابِ}**

(**Xajka waa bilo la yaqaan, ee ruuxii gudagala bilahaas xajka, afxumo, fisqi iyo muran ma jiro xajka dhexdiisa, waxaad fashaan oo khayr ah wuu ogaan Alle, ee sahay qaata, sahay tan u khayrbadanna waa dhawrsashada, ee iga dhawrsada kuwa caqliga lahow**)

Wuxuu yiri rasuulka:

**(مَنْ أَتَى هَذَا الْبَيْتَ ، فَلَمْ يَرْفُثْ ، وَلَمْ يَفْسُقْ رَجَعَ كَمَا وَلَدَتْهُ أُمُّهُ)**

(**Qofka yimaado gurigan aan afxumo sameynin fisqina sameyinin wuxuu u noqonayaa sida maalinta hooyadii ku dhashay oo kale**)

Waxaa lagu yiri Xasan Albasri: xajka sida fiican loo gutay abaalkiisa ma janno baa? wuxuu yiri: (taas waxaa calaamo u ah inuu kasoo noqdo asoo adduunka aan jeclayn aakhirana jecel), waxaa lagu yiri: (xajka abaalkiisa ma dambidhaaf baa?) wuxuu yiri: (taas waxaa astaan u ah inuu ka tago camalka xun uu sameyn jiray).

Cibaadada haddaysan saameynin qofka akhlaaqdiisa oo dhaqankiisana aysan toosinin wax ay u tarayso malaha adduunka, aakhirana wax miro ay leedahay ma jiraan, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

**(أَتَدْرُونَ مَنِ الْمُفْلِسُ؟) قَالُوا: المُفْلِسُ فِينَا يَا رَسُولَ اللَّهِ مَنْ لَا دِرْهَمَ لَهُ وَلَا مَتَاعَ ، قَالَ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) : (المُفْلِسُ مِنْ أُمَّتِي مَنْ يَأْتِي يَوْمَ القِيَامَةِ بِصَلَاتِهِ وَصِيَامِهِ وَزَكَاتِهِ ، وَيَأْتِي قَدْ شَتَمَ هَذَا وَقَذَفَ هَذَا، وَأَكَلَ مَالَ هَذَا، وَسَفَكَ دَمَ هَذَا، وَضَرَبَ هَذَا فَيَقْعُدُ فَيَقْتَصُّ هَذَا مِنْ حَسَنَاتِهِ ، وَهَذَا مِنْ حَسَنَاتِهِ ، فَإِنْ فَنِيَتْ حَسَنَاتُهُ قَبْلَ**

أَنْ يُقْتَصّ مَا عَلَيْهِ مِنَ الخَطَايَا أُخِذَ مِنْ خَطَايَاهُمْ فَطُرِحَ عَلَيْهِ ثُمَّ طُرِحَ فِي النَّارِ)

(Ma ogtihiin qofka waxba haysanin, waxay dhaheen qofka waxba haysanin rasuulkii Allow waa qofka aan lahayn lacag iyo alaab, wuxuu yiri (qofka waxba haysanin ummaddayda waa qofka la imaanayo maalinta qiyaame salaaddiisa iyo soonkiisa iyo sakadiisa, wuxuu imaanayaa asoo midkan soo caayay kanna soo qadfiyay kan hantidiisana soo cunay, kan dhiiggiisana soo daadiyay, kanna soo garaacay, wuu fariisanayaa midkan wuxuu ka goosanayaa xasanaadkiisa midkanna wuxuu ka goosanayaa xasanaadkiisa, markay xasaandkiisu dhamaadaan intaan laga goosanin wixii gafaf uu galay waxaa lasoo qaadayaa gafafkooda isaga ayaa lagu tuurayaa kaddibna naarta ayaa lagu tuurayaa).

ولما سُئل (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ): يَا رَسُولَ اللَّهِ ، إِنَّ فُلَانَةَ يُذْكَرُ مِنْ كَثْرَةِ صَلَاتِهَا ، وَصِيَامِهَا ، وَصَدَقَتِهَا ، غَيْرَ أَنَّهَا تُؤْذِي جِيرَانَهَا بِلِسَانِهَا ، قَالَ : (هِيَ فِي النَّارِ) ، قَال: يَا رَسُولَ اللَّهِ ، فَإِنَّ فُلَانَةَ يُذْكَرُ مِنْ قِلَّةِ صِيَامِهَا ، وَصَدَقَتِهَا ، وَصَلَاتِهَا ، وَإِنَّهَا تَصَدَّقُ بِالْأَثْوَارِ مِنَ الْأَقِطِ ، وَلَا تُؤْذِي جِيرَانَهَا بِلِسَانِهَا ، قَالَ : (هِيَ فِي الْجَنَّةِ).

Marka la weyddiiyay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - oo lagu yiri: rasuulkii allow heblaay waxaa laga sheegaa inay wax badan dukato wax badanna soonto wax badanna sadaqaysato laakin deriskeeda ayay afkeeda ku dhibaysaa, wuxuu yiri: (**naarta ayay galaysaa**) wuxuu yiri: rasuulkii allow heblaay waxaa laga sheegaa yaraanta soonkeeda iyo sadaqadeeda iyo salaaddeeda waxay sadaqaysataa caanaha eedagga, deriskeedana kuma dhibto afkeeda wuxuu yiri: (**jannada ayay galaysaa**).

Arrimaha loo baahan yahay addoonka inuu ku dadaalo waa khaatumada suuban, xaqiiqadeedana waa: inuu Ilaahay waafajiyo addoonka geeridiisa kahor inuu ka fogaado wixii Ilaahay ka caraysiinaya, iyo inuu u fududeeyo waddada uu kaga towbadkeeni lahaa dambiyada, iyo inuu aado daacooyinka iyo camalka suuban, kaddib sidaas uu ku geeriyoodo.

Hadduu aadanaha ku xiran yahay camalkiisa xagga adduunka towfiiqda camalka suuban iyo in la daa'imo ilaa geerida calaamad waxay u yihiin khaatumada suuban, siduu noo sheegay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - markuu yiri:

**(إِنَّمَا الْأَعْمَالُ بِالْخَوَاتِيمِ) ، وفي رواية : (إِنَّمَا الْأَعْمَالُ كَالْوِعَاءِ ، إِذَا طَابَ أَسْفَلُهُ طَابَ أَعْلَاهُ ، وَإِذَا فَسَدَ أَسْفَلُهُ فَسَدَ أَعْلَاهُ)**

(**camalka waa uun khaatumada**) riwaayo kale waxaa ku sugan: (**camalka waa sida weelka oo kale, haddii hootiisa ay fiicnaato korkiisana wuu ficnaanayaa, haddii hostiisa ay xumaato korkiisana wuu xumaanayaa**), sidaa awgeed qof kaste waxaa laga rabaa inuu dadaalo si khaatumadiisa ay u ficnaato, iyo inuu isu diyaariyo in Ilaahay camal suuban uu kula kulmo, siduu nagu hagay quraanka kriimka oraahda Alle:

**{فَمَن كَانَ يَرْجُو لِقَاءَ رَبِّهِ فَلْيَعْمَلْ عَمَلاً صَالِحًا وَلاَ يُشْرِكْ بِعِبَادَةِ رَبِّهِ أَحَدًا}**

(**Ruuxiise dooni la kulanka rabbigiisa ha falo camal fiican, yuuna la wadaajin cibaadada rabbigiisa cidna**.), qofkii Ilaahay ka cabsado oo amarkiisa yeelo wuxuu reebana ka haro Ilaahay wuxuu waafajinayaa camalka suuban kaddib wuu ku oofsanayaa, siduu nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - ugu caddeeyay oraahdiisa:

**(إِذَا أَرَادَ اللَّهُ بِعَبْدٍ خَيْرًا اسْتَعْمَلَهُ)، فقيل: كيف يستعمله يا رسول الله؟ ، قال : (يُوَفِّقُهُ لِعَمَلٍ صَالِحٍ قَبْلَ الْمَوْتِ) ، وفي رواية : (إِذَا أَرَادَ**

**الله بِعَبْدٍ خَيْرًا عَسلَهُ) ، قِيلَ: وَمَا عَسلَهُ ؟ ، قَالَ: (يَفْتَحُ اللَّهُ لَهُ عَمَلًا صَالِحًا قَبْلَ مَوْتِهِ ، ثُمَّ يَقْبِضُهُ عَلَيْهِ)**

(**Hadduu Alle addoon khayr la doono wuu shaqagalinayaa**) waxaa la yiri: siduu u shaqagalianyaa rasuulkii allow? Wuxuu yiri: (**wuxuu waafajinayaa camal suuban geerida kahor**) riwaayo kale waxaa ku sugan: (**hadduu Alle addoon khayr la doono wuu maceynayaa**) waxaa la yiri: maxaa laga wadaa wuu maceynayaa? Wuxuu yiri: (**wuxuu u furayaa camal suuban geeridiisa kahor kaddib ayuu oofsanayaa**),

Meesha laga eegayo camalka waa khaatumada, qofka Ilaahay daacada waafajiyo iyo cibaadada oo daa'ima samafalka waxaa loogu khatimayaa khaatumo suuban, wuxuuna ka mid noqonayaa dadka jannada ku guulaysta, wuxuu yiri Alle:

**(وَأَمَّا الَّذِينَ سُعِدُوا فَفِي الْجَنَّةِ خَالِدِينَ فِيهَا مَا دَامَتِ السَّمَوَاتُ وَالْأَرْضُ إِلَّا مَا شَاءَ رَبُّكَ عَطَاءً غَيْرَ مَجْذُوذٍ)**

(**Kuwa la liibaanayna jannay ku waari inta samooyinku jiraan iyo dhulku wuxuu Alle doono mooyee, waana siismo aan go'ayn**)

casharrada laga faa'idaysanayo xajka waxaa ka mid ah xaajiga ama qofka kaleba: in toos loogu hoggaansamo Alle - *cazza wajalla*- iyadoo asbaabta la qaadanayo, iyo qofka inuu rumeeyo in arrinka oo dhan Alle u sugan

yahay, iyo wixii Alle qadaray si kaste inuu dhacayo, wuxuu leeyahay Alle - *subaxaanahu watacaalaa* -:

**{وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ وَلا مُؤْمِنَةٍ إِذَا قَضَى اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَمْرًا أَن يَكُونَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ مِنْ أَمْرِهِمْ وَمَن يَعْصِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ ضَلَّ ضَلالا مُّبِينًا}**

(**Kuma haboona (umana banaana) nin mu'min ah iyo haweenay mu'minad ah marka Alle iyo rasuulkiisu wax xukumayaan inay iktiyaar u yeeshaan amarkooda, ruuxiise caasiya Alle iyo rasuulkiisa wuxuu dhumay dhumid cad**)

Wuxuu leeyahay Alle:

**{مَّا يَفْتَحِ اللَّهُ لِلنَّاسِ مِن رَّحْمَةٍ فَلَا مُمْسِكَ لَهَا وَمَا يُمْسِكْ فَلَا مُرْسِلَ لَهُ مِن بَعْدِهِ وَهُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ}**

(**Wixii Alle dadka ugu nicmeeyo oo naxariis ah wax celin karaa majiro, wuxuu celiyaana wax soo dayn kara ma jiro gadaashiisa, waana adkaade falsan**), wuxuu leeyahay Alle:

**{وَإِن يَمْسَسْكَ اللَّهُ بِضُرٍّ فَلَا كَاشِفَ لَهُ إِلَّا هُوَ وَإِن يَمْسَسْكَ بِخَيْرٍ فَهُوَ عَلَى كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ * وَهُوَ الْقَاهِرُ فَوْقَ عِبَادِهِ وَهُوَ الْحَكِيمُ الْخَبِيرُ}**

(**Hadduu ku taabsiiyo Alle dhib wax faydi ma jiro isaga mooyee hadduu ku taabsiiyo khayrna isagaa wax walba kara * waana ka adkaadaha addoomadiisa korkooda waana falsame xeel dheer**)

In Ilaahay toos loogu hoggaansamo waa calaamadda iimaanka iyo astaanta islaamka, si arrintaas loo helo waxaa lagama maarmaan ah inuu aadanaha maladiisa xagga Ilaahay fiicneeyo, hadduu raalli ku noqdo qadar Alle arrinkana Ilaahay uu u dhiibo wuxuu ku raaxaysanayaa raalli, sidoo kale wuxuu dareemayaa deganaan iyo xasillooni

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Xaajiga xajkiisa ayuu kaga soo laabtay idinka Ilaahay asoo loo dhaafay dambgiisa, socodkiisana lagu shukrinayo, camalkiisana laga abaalmarinayo, ha iska

jiro inuu ku kadsoomo amaanta dadka, xajka ma aha magac la helayo, mana aha wax laysugu faano, xaajiga waxaa laga rabaa markuu kasoo laabto inuu noqdo qof aan isla weynayn oo Alle ka baqaya, xajka waa waajib aad u weyn oo ajar badan, qofka guto oo u dulqaato qalbigiisa ayuu ka macaansanayaa, raadkiisana noloshiisa ayaa laga arkayaa asoo Ilaahay isu jabinayo iyo addoomaha Ilaahay u dabacsanaanayo, naftiisa aan kibir galaynin, daacadiisana ismahdis aan soo galaynin, daaco ma jirto oo qofka mu'minka si ikhlaas ku gudanayo iyo niyad daacad ah hadday saas dhacdo daaco kale ayay ku riixaysaa iyo cibaado korraysa, kama suulo inuu cibaado kasii aadayo cibaado kale, sidoo kale daaco ilaa daaco kale ilaa uu ka gaaro darajada ixsaanka, taasna waxay ka mid tahay astaamaha aqbalidda daacada, Alle wuxuu sheegay dadka iimaanka leh inay ku degdegaan khayraadka, waxay ka baqayaan inaan laga aqbalin, rajo damac ayay ka qabaan in laga aqbalo oo abaalkiisa ay helaan, wuxuu yiri Alle:

**{إِنَّ الَّذِينَ هُمْ مِنْ خَشْيَةِ رَبِّهِمْ مُشْفِقُونَ * وَالَّذِينَ هُمْ بِآيَاتِ رَبِّهِمْ يُؤْمِنُونَ *وَالَّذِينَ هُمْ بِرَبِّهِمْ لَا يُشْرِكُونَ * وَالَّذِينَ يُؤْتُونَ مَا آتَوْا وَقُلُوبُهُمْ وَجِلَةٌ أَنَّهُمْ إِلَى رَبِّهِمْ رَاجِعُونَ* أُولَئِكَ يُسَارِعُونَ فِي الْخَيْرَاتِ وَهُمْ لَهَا سَابِقُونَ*}**

(**Kuwa uun cabsida rabbigooda la baqaya * kuwa uun aayaadka rabbigooda rumeeya * kuwa uun rabbigooda aan la wadaajinin * kuwa bixinaya waxa la siiyay iyadoo ay ka cabsan quluubtoodu inay xagga Alle u noqon * kuwaasaa u degdega khayraadka kuna hormaraya ***), wuxuu leeyahay Ibnu Kathiir: "way baqayaan iyagoo leh iimaan iyo ixsaan iyo camal suuban, waxay ka cabsadaan Alle waxay ka baqaan inuu xaalkooda isbaddalo.

**فعَنْ أم المؤمنين عَائِشَةَ (رضي الله عنها) ، قَالَتْ: يَا رَسُولَ اللَّهِ ، قول الله تعالى: {والَّذِينَ يُؤْتُونَ مَا آتَوْا وَقُلُوبُهُمْ وَجِلَةٌ أَنَّهُمْ إِلَى رَبِّهِمْ رَاجِعُونَ} هُوَ الَّذِي يَسْرِقُ ، وَيَزْنِي ، وَيَشْرَبُ الْخَمْرَ ، وَهُوَ يَخَافُ اللَّهَ؟ قَالَ : (لَا يَا بِنْتَ أَبِي بَكْرٍ ، يَا بِنْتَ الصِّدِّيقِ ، وَلَكِنَّهُ الَّذِي يُصَلِّي ، وَيَصُومُ ، وَيَتَصَدَّقُ ، وَهُوَ يُخَافُ اللَّهَ عَزَّ وَجَلَّ) ؟.**

Waxaa laga wariyay Caa'isho – *Ilaahay raalli haka noqdee* - waxay tiri: rasuulkii allow oraahda Alle: (**kuwa bixinaya waxa la siiyay iyadoo ay ka cabsan quluubtoodu inay xagga Alle u noqon**) midka wax xado oo sinaysto oo khamrada cabbo oona Ilaahay ka cabsado miyaa? wuxuu yiri: (**maya Abuubakr inantiisow**

**siddiiq gabadhiisow waa kan tukada oo sooma oo sadaqaysta oona Ilaahay ka baqa**)

Qofka mu'minka kama fikiro badnaanta cibaadada iyo sunnooyinka, wuxuu ka fikiraa aqbalidda camalka, iyo wixii noloshiisa saameyn ku yeelanaya xagga cibaadooyinka, Alle wuxuu amray nabigiisa - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - inuu ku dadaalo daacada, inuusan yaraysanin camal oo markaa uu ka tago iyo inuusan badsanin camal markaa uu aad ula dhaco, wuxuu sheegay nabiga ismahdiska inuu ka mid yahay waxyaalaha qofka haliga oo camalka buriya, Ibnu Cabbaas – *Ilaahay raalli haka noqdee* -ayaa laga wariyay inuu yiri rasuulka:

(**الْمُهْلِكَاتُ ثَلاثٌ : إِعْجَابُ الْمَرْءِ بِنَفْسِهِ ، وَشُحٌّ مُطَاعٌ ، وَهَوًى مُتَّبَعٌ**)

(**Kuwa wax haligo waa seddex: qofka naftiisa inuu mahdiyo, iyo bakhyalnimo la adeeco iyo hawo la raaco**)

**Ilaahayow noogu kalmeey xuskaaga iyo mahdintaada iyo cibaadadaada suuban, na waafaji inaan ku toosnaano waddada daacada iyo cibaadada**